



Baabuurkaaga u Diyaari Xaaladaha Degdegga

Marka aad qorshe u sameysanaysid xaaladaha degdegga, ha iloobin baabuurkaaga: u hubso in baabuurka yar, baabuurkaaga weyn ama baabuurkaaga baska yar ah (van) uu si fiican u shaqeynayo, oo diyaarso xidhmo ah alaabooyinka degdegga.

Diyaari baabuurkaaga

- Baabuurkaaga ku hayso xidhmo ah alaabooyinka degdegga.
- Isu diyaari inaad kaligaa isku filaatid ugu yaraan 24 saacadood.
- Taariikhda ku qor dhammaan cuntada iyo biyaha ku kaydsan xidhmadaada. Beddel alaabooyinka lix bilood kasta.
- Cuntooyinka ha ku jiraan baco aan hawada soo daynaynin gudaha xidhmadaada.

Alaabooyinka degdegga ee baabuurkaaga

- Hal gallaan oo ah biyo halkii qof. Biyaha ku kaydi dhalooyinka waaweyn ee cabitaanada fudud.
- Iska ilaali isticmaalidda weelka sida qardaasyada caanaha ama dhalooyin ah quraarad/qarsho ee burburi doona ama jabi doona.
- Cuntada degdegga. Iska ilaali cuntooyinka kugu ridi doona haraad. Dooro siriyaalka ah xabuub kaamil ah (whole grain cereals) iyo cuntooyinka leh hoore badan. Ku dar cuntada ilmaha yar iyo dadka kale ee leh cuntooyin gaar ah.
- Majarafad/badiil yar, xadhkaha kicinta baabuurka (jumper cables), silsiladda jiidista
- Iftiinka digniinta jidka (road flare)
- Raadyo ku shaqeeya baytariyo/baytariyo dheeraad ah
- Toosh/karbuuno iyo baytariyo dheeraad ah
- Dab-damiye nooca ABC
- Siidhi/firimbi
- Bacaha kaydinka
- Lacag kaash ah iyo sunuud teleefonka dibadda lagu isticmaalo
- Kayd ah dawooyinka muhiimka ah
- Kabo adag, sharabaadyo/iskaalsho, gacmo-galisayada shaqada
- Dharka iyo kabaha roobka
- Busteyaasha “mylar”, darbaalada/shiraaqyada gaboodka oo balaastig ah
- Kabriid/araq ku jira weel aan biyuhu galayn
- Gacmo-galisyo ah “latex” (ugu yaraan 2 lammaane)
- Maabka aagga (si loo helo gaboodyada)
- Kombas/Jiheeye
- Ciyaaraha iyo buugaagta ilmaha yaryar
- Cuntada iyo alaabooyinka xayawaanka guriga
- Waraaqaha musqusha, shukumaano/tuwaalo yaryar
- Alaabta nadaafadda haweenka iyo shakshiga
- Xafaayadaha/dhaybarada iyo masaxyada ilmaha yaryar

Wadista baabuurka ee xaaladaha adag

- Wad iyada oo nalalka/indhaha baabuurka shidan yihiin.
- Buuxi taangiga shidaalka ka hor inta aanad galin baadiyaha/miyiga. Joogso si aad u buuxisid goor hore ka hor inta aan taangigu naaqus noqon.
- Ha isku dayin inaad xawaare kaga baxsatid xaaladaha.
- Goor hore bilaw. Xusuuso in xadka xawaaraha ee la muujiyay u yahay mid loogu talagalay laamayda engegan.
- Masaafu kugu filan oo aad ku joogsatid ha idiin dhexeyso baabuurka kaa horeeya.
- Si taxadir leh u wad baabuurka. Marka xaaladuhu xun yihiin wakhtiga aad ku joogsan kartid wuu ka dheer yahay wakhtiga caadiga ah.
- Meel hore eeg oo ka fog inta aad caadi ahaan eegtid si aad u heshid wakhti dheeraad ah oo aad si ammaan leh uga jawaabtid xaaladaha.
- Si taxadir leh u wad baabuurka marka aad u dhow baabuurta xamuulka.

Baabuur wadista jiilaalka

- Is diyaar adiga oo diyaarsanaya taayiro jiilaal oo fiican, silsilado, qalabka xoqista, iyo kiish ah ciid oo loogu talagalay silbashada barafka.
- Qaado dhar jiilaal oo dheeraad ah — xeerka ugu horeeya ee raaxada iyo badbaadista jiilaalka waa inaad qallalnaatid oo aanad qoyin.
- Ha isticmaalin “cruise control” marka ay jiraan xaalado jiilaal. Taabasho yar oo aad ku sameysid baraykyadaada si aad uga saartid “cruise control” waxay keeni kartaa inuu lumo xukunka baabuurka.
- Xusuuso: Baabuur ah “four-wheel drive” waxa uu jidka baraf leh ugu silban karaa si la mid ah baabuurka ah “two-wheel drive” vehicle.
- U hubso in baabuurkaaga xaaladdiisu fiican tahay oo uu shaqeynayo. Hubi kuwan:

Habka daarista
Habka shidaalka
Suumanka
Heerarka hooreyaasha
Baraygyada
Habka qiiq-saarka
Baytariyo
Antifiriis (antifreeze)
Muraayad masaxe

Biyaha muraayadda
Tareedhka (tread)/
hawada taayirka
Baraf dhalaaliye
(defroster)
Saliid haboon
Habka qaboojinta
Nalalka/laydhka



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-047
Somali